

Cabasho

Sharciga iskuulada (2010:800 cutub 4 § 8) wuxuu maamulka farayaa in nidaam loo sameeyo qaabilaadda iyo baarista cabashooyinka ka yimaada waxbarashada. Xeer ahaan waxaa ugu horeyn cabashada loo gudbiyaa maamulaha qaabilsan cabashooyinka, madaxa xannaanada ama xilhaye u dhigma, si markaa ka dib loogu sii gudbiyo madaxa waaxda Carruurta iyo waxbarashada ee hoos timaadda waaxda Daryeelka iyo nabadgelyada.

Degmada Götene waxay dhammaan carruurta, ardada iyo qoysaska u soo jeedineysaa bey'ad wanaagsan ee wax lagu barto iyo waxbarasho tayo sare leh. Sidaa daraadeed ra'yigaaga waa inoo muhiim. Si aan u saxno qaladaadka iyo iimaha jira una horumarino hawsheena.

Ujeeddada waxay tahay in:

- la kordhiyo awoodda shakhsiga
- si dhaqso leh wax looga qabto iimaha soo baxa
- la xoojiyo xuquuqda carruurta iyo ardada

Yaan u soo bandhigaa cabashadeyda?

Marka hore cabashadaada la tag qofka, waaxda ama qeybta ay khuseyso. Markay noqoto xannaanad iyo iskuul waxaad marka hore dhaleeceyn u soo jeedineysaa hawlwadeenka ay arrintu khuseyso. Haddii taasu ay xal u noqon weydo dhibaatooyinka jira, ama xiriirkaa loo dareemo mid xasaasi ah, waxaad arrinta u gudbineysaa maamulaha xannaanada ama iskuulka.

Miyaan qoraa cabashada?

Haddaad ka cabaneyso waxbarashada ay hormuudka u tahay degmada Götene waxaad taa ku soo gudbin kartaa e-boosto, warqad ama telefon.

Hawsha ayey dabcan fududeyneysaa haddaad dacwada qoraal ku soo gudbiso. Waaxdaada xannaanada ama iskuulka ayaad taa caawino uga heli kareysaa. Waxaad adeegsan kartaa foomka ku yaal bogga xaggiisa ugu hooseysa.

Muddo intee la eg ayaan jawaab ku helayaa?

Waxaan ku dadaaleynaa inaan jawaabta soo dedejino. Mararka qaarkood cabashadu waxay noqon kartaa mid adag ama sabab kale daraadeed inooga baahato baaris dheeraad ah.

Nidaamka falanqeynta cabashooyinka ee waxbarashada iyo barbaarinta

- Marka cabashada la helo waa la diiwaangeliyaa oo sidaa waxey ku noqotaa warqad u furan dadweynaha oo ay cid waliba akhrisan karto.
- Waxaa la go'aaminayaa cid arrinta falanqeysa.
- Jawaab qoraal ah ayaa la siinayaa qofka soo jeediyey dhaleecada/cabashada in la guddoomay iyo cidda loo xilsaaray falanqeynteeda.

Haddaan ku qanci waayo jawaabta?

Waxaa markaa dalban kartaa in mas'uulka ka sarreeya kii hore uu dib u eego arrinta. Kaana arrinta oo dhan ayuu dib u baarayaa oo eegayaa inay jiraan waxyaalo aan caddeyn ama qalad ah.

Cabashada xaggee bay ku dambeyn doontaa?

Cabashooyinka qoraalka ah ee la guddoomay dhammaantood waa lagu nidaamiyaa oo waxay noqdaan qeyb ka mid ah hawlaha horumarinta tayada ee waaxda Carruurta iyo waxbarashada ee hoos timaadda waaxda Daryeelka iyo nabadgelyada.

Yaa akhrisan kara cabashooyinkeega?

Dhab ahaantii cid kasta. Waa muhiim in la og yahay in wax kasta ee aad u qorto degmada ay yihiin qoraallo u furan dadweynaha oo inta badan ay cid kasta akhrisan karto. Mararka qaarkood qoraalka ama qeybo qoraalka ka mid ah taa waa laga reebi karaa oo sir ayaa laga dhigaa.

Warbixin xiriir

Markaad la xiriireyso waaxda degmada ee ay arrintaadu khuseyso waxaad ka warbixineysaa waxa cabashadu ama dhaleecadu ay ku saabsan tahay iyo sida aad dooneyso in lagu soo xiriiriyo. Waa suurogal in qofka uusan isa sheegin, hase ahaatee markaa ma heli kareyno wax fursad ah ee aan kugu soo warcelinno sida aan u falanqeynay dhaleecadaada ama cabashadaada. Mararka aad dooneyso jawaab waxaan u baahan nahay e-mailkaaga, telefon lambarkaaga ama cinwaankaaga.

Cabasho waxbarasho ee ku socota degmada Götene

Mail name e-mail:

Iskuulka ay khuseyso *

[Välj alternativ] ▼

Cabasho *

A large, empty rectangular text area with a light gray background. It features a vertical scrollbar on the right side and a horizontal scrollbar at the bottom, both with standard arrow and page indicators.

Soo jeedin wax ka qabad

A large, empty rectangular text area with a light gray background. It features a vertical scrollbar on the right side and a horizontal scrollbar at the bottom, both with standard arrow and page indicators.

Warbixin xiriir

Xog

Magac:

Ina aye:

Cinwaan:

Boosto lambar:

Cinwaan boosto/xaafad:

Telefon:

E-boosto: